KU DHAQAN XAFIIS DAWLADEED

# FAAFIN RASMI AH

# الجريدة الرسمية

EE JAMHURIYADDA DIMUQRADIGA SOMALIYA

الجمهورية الصومال الديمقراطية

Sannadka 3aad — Muqdisho, 10 Maarso 1975 — L. 2 R. 3

Laanta Faafinta Rasmiga ah ee Madaxtooyada Golaha Sare ee Kacaanka

FAAFIN BIL SOO BAXA

**QIIMADU:** waa 5 shilin lambar waliba — **RUKUNKA:** Sanadii waa Sh. 100 Somaliya gudeheeda — dibaddedana waa Shs. 300. Rukunka la weydiisto waqtiga loo gooyey wuxuu ka bilabmaa 1 Janayo. Qiimaha qortitaanku F. R. halkii sadar iyo waxii ka yar waa 2 laba shilin — Rukunka iyo qoritaanku waxaa la weydiistaa Laanta Maamulka Faafinta Rasmiga ah — Lacagta waxaa lagu bixinayaa Xafiiska Canshuraha ee Wasaaradda Lacagta

# KOBNIIN

## BOGGA KOWAAD

### SHARCI

SHARCI L. 24 Tr. 1 Maarso 1975 — *Wax ka beddelid Sharciga Dhowritaanka Badbaadada Ummada.* Bog. 173

SHARCI L. 25 Tr. 4 Febberayo 1975 — *Beddelaad Sharci L. 35 Taariikh 21-4-73.* » 175

## BOGGA LABAAD

### XEER

XEER MADAXWEYNAHA GOLAHA SARE EE KACAANKA, 24 Febberayo 1975 L. 42 — *Dallacsiin Gaashaanle Sare oo laga dhigay Sarreeye Guuto.* » 175

WASAARADDA ARRIMAHA GUDAHA, 13 Febberayo 1975 — *Magacaabid Guddiyo Kacaan ee Degmooyinka Belet-Weyne, Buulo-Burti, Jalalaqsi. L. 43* » 177

Madbacada Qaranka — Muqdisho

# BOGGA SADDEXAAD

## TALOOYIN, ISGARSIIN, OGEYSIIS, IYO WAXII LA MID AH


WASAARADDA HAWLAHA GUUD, Tr. 29 Sebteembere 1974 — *Naado Dhul J.le Cabduraxmaan Xaaji Xasan. (27)* Bog. 179

WASAARADDA HAWLAHA GUUD, Tr. 30 Oktoobere 1974 — *Naado Dhul J.le Cabduraxmaan Xaaji Xasan. (28)* » 179

WASAARADDA HAWLAHA GUUD, Tr. 30 Oktoobere 1974 — *Naado Dhul J.le Cabduraxmaan Xaaji Xasan. (29)* » 180

WASAARADDA HAWLAHA GUUD, Tr. 30 Oktoobere 1974 — *Naado Dhul J.le Cabduraxmaan Xaaji Xasan. (30)* » 180

WASAARADDA HAWLAHA GUUD, Tr. 1 Maarso 1975 — *Naado Dhul J.le Maxamed Cabaas Suufi. (31)* » 181

WASAARADDA HAWLAHA GUUD, Tr. 1 Maarso 1975 — *Naado Dhul J.le Maxamed Xaaji Cabdullahi. (32)* » 181

WASAARADDA HAWLAHA GUUD, Tr. 1 Maarso 1975 — *Naado Dhul J.le Xaaji Ibraahim Nuur. (33)* » 182

WASAARADDA HAWLAHA GUUD, Tr. 1 Maarso 1975 — *Naado Dhul J.le Axmed Yuusuf Maxamed. (34)* » 182

WASAARADDA HAWLAHA GUUD, Tr. 1 Maarso 1975 — *Bedd. Naado Dhul J.le Cusman Axmed Doore. (35)* » 183

MAXKAMADDA GOBOLKA BANAADIR, Tr. 26 Jenayo 1975 — *Buugga Lacagta L. 10380 So. Sh. 500 uu leeyahay Axmed Saleemaan Bidde. (36)* » 183

MAXKAMADDA GOBOLKA QARDHO, Tr. 29 Jenayo 1975 — *Jeegga L. 005582 So. Sh. 1.300 uu leeyahay Jaalle Cumar Ismaciil Xaaji Samantar. (37)* » 184

MAXKAMADDA GOBOLKA BANAADIR, Tr. 4 Maarso 1975 — *Buugga Lacagta L. 741 So. Sh. 1.100 uu leeyahay Axmed Nuur Muddo. (38)* » 184

MAXKAMADDA GOBOLKA BANAADIR, Tr. 3 Maarso 1975 — *Buugga Lacagta L. 6844 So. Sh. 3.000 iyo So. Sh. 26 oo korsaar ah Ambiya Nuur Afrax. (39)* » 185

MAXKAMADDA GOBOLKA SH. HOOSE, Tr. 6 Maar- 1975 — *Buugga L. 1329 So. Sh. 5.005 uu leeyahay Xuseen Axmed Cabdurab. (40)* » 185

MAXKAMADDA GOBOLKA BANAADIR, Tr. 25 Febberayo 1975 — *Jeegga wareega L. 006620 So. Sh. 550,00 ay leedahay Wasaaradda Gaashaandhigga. (41)* » 186

MAXKAMADDA GOBOLKA J. HOOSE, Tr. 20 Febberayo 1975 — *Buugga Kaydka, L. 1529 So. Sh. 3.150 uu leeyahay Cabdullahi Cali Salaad. (42)* » 186

MAXKAMADDA GOBOLKA BANAADIR, Tr. 19 Maarso 1975 — *Jeegga wareega L. 12.106 So. Sh. 8.600 uu leeyahay Saciid Maxamede Madar. (43)* » 187

# BOGGA KOWAAD

# S H A R C I

SHARCI L. 24 Tr. 1.3.1975.
Wax ka beddelid Sharciga «Dhowritaanka Badbffdada Ummadda».

GUDDOONSHAHA

GOLAHA SARE EE KACAANKA

ISAGOO TIXGELINAAYA Go'aanka Golaha Sare ee Kacaanka iyo ka Xoghayayaasha Dowladda;

WUXUU SOO SAARAYAA

Sharciga soo socda:

Qod. 1aad

*Caddeyn*

Haddii aan si kale loo micneyn, erayada hoos ku qoran waxaa loola jeeda sida soo socda:

«Qof Kasta» — Waxaa loola jeedaa q of kasta oo ka mid ah shaqaalaha Dowladda Wakaaladaha, Dowladda Hoose, sharikadaha ama mashrucyada Dowladdu qeyb ku leedahay ama qof aan ka mid aheyn shaqaalaha.

«Xoolaha Dowladda» waxaa loola jeeda waxii lacag ah iyo wixii xoolo ah oo ku tilmaaman qodobada 4 ilaa 7 xeerka Lam. 318 taariikh 18 dishembre 1962 (Xeerka Xoolaha Dowladda) oo ay leedahay Dowladda, Wakaaladda, Dowladda Hoose, sharikadda ama mashruuc oo Dowladda qeyb ku leedahay.

Qod. 2aad

*Booli Qaran*

Qodobka 13aad ee Sharciga lambarkiisu yahay 54 taariikhdiisuna tahay 10 Settembre 1970 oo ku saabsan «Booli Qaran» kuna qoran sharciga «Dhowritaanka Badbaadada Ummadda», waa la beddelay, waxaa loo akhrin doonaa sida soo socota:

Qodobka 13aad.

*Booli Qaran*

Qof kasta ee xada ama qaata ama si isaga gaar u ah ugu takrifala cid kale ugu faa'iideeyo lacag ama xoolaha lagu tilmaamay sharcigan si toos ah ama si aan toosneyn (direttamente o indirettamente) wuxuu ahaanayaa qof dembile ah, wuxuuna muteysanayaa ciqaab oo ah:

1) — Xabsi toban sano ilaa labaatan sano qof kasta oo ku caddato dembiga «Booli Qaran»;

2) — Xabsi daa-im ah hadii tirada lacagta ama qiimaha xoolaha gaareyso ama ka badantahay Shs. 50.000 (kontonkun-shilinsoomaali);

3) — Ciqaab «DIL» ah hadii tirada lacagta ama qiimaha xoolaha ay gaareyso ama ka badantahay Shs. 100.000 (boqolkun-shilinsoomaali).

Qod. 3aad

*Garsoorid*

Sii loo helo Garsoor toosan oo ku dhisan caddalad, waxaa had iyo jeer waalib ku ah Maxkamaddu intaanay xukunkeeda ku dhawaaqin inay si gaar ah u tixgeliso waxyaabaha dembiyada cusleeya iyo kuwa fudu-deeya (aggravating and extenuating circomstances).

Qod. 4aad

*Burin*

Sharci kasta oo qodobadda sharcigan ka soo horjeeda ama aan la socon karin waa la buriyay.

Qod. 5aad

*Dhaqan gelid*

Sharcigan wuxuu dhaqan gelayaa marka laga bilaabo taariikh 23 Jenayo 1975.

Qod. 6aad

Sharcigan waxaa lagu qori doonaa Faafinta Rasmiga ah ee Dow-ladda.

Muqdisho, 1 Maarso 1975.

GUDDOONSHAHA
GOLAHA SARE EE KACAANKA
*Jaalle S. G. Maxamed Siyaad Barre*

SHARCI L. 25 Tr. 4 Febberayo 1975.
Beddelffd Sharci L. 35 taariikh 21.4.73.

GUDDOONSHAHA

GOLAHA SARE EE KACAANKA

ISAGOO TIXGELINAAYA Go'aankii Golaha Sare ee Kacaanka iyo kan Xoghayayaasha Dawladda:

WUXUU SOO SAARAYAA

Sharciga soo socda:

Qod. 1aad

Guddiga Bulshada ee M.G.S.K. waxay qaban doonta hawlihii loo xilsaaray Guddiga dhexe ee maamulka Xarumaha Dhallinta Kacaanka «Central Supervisory» sida ku qoran sharciga lamb. yahay 35 ee 1.4.73 qodobka 7aad xubina 1aad.

Qod. 2aad

Guddiga Bulshada waxay awood u yeelan doonaan inay magacaabaan Guddi hoose (Technical Committee) kuna kooban Saraakiil ka tirsan Wasaaradaha Arrimaha Gudaha, Caafimaadka, Caddaaladda iyo Diinta, Ciidamada Asluubta iyo Xafiiska Siyaasadda Madaxtooyada Golaha Sare ee Kacaanka ay hawlahoodu la xiriiraan Xarumaha Dhallinta Kacaanka.

Qod. 3aad

Guddiga dhexe ee maamulka Xarumaha Dhallinta Kacaanka oo lagu tilmaamay sharciga lamb. 35 taariikh 1.4.73 qod. 7aad xubinta 2aad waa la nasakhay (Sciolto).

Qod. 4aad

Sharcigani wuxuu hirgalayaa marka laga bilaabo taariikh 4.2.75, waxaana lagu soo saari doonaa Faafinta Rasmiga ah ee Dawladda.

Muqdisho, 4 Febberayo 1975.

*Jaalle S. G. Maxamed Siyaad Barre*
GUDDOONSHAHA
GOLAHA SARE EE KACAANKA

# BOGGA LABAAD

## X E E R

XEER MADAXWEYNAHA GOLAHA SARE EE KACAANKA
Tr. 24 Febberayo 1975, L. 42.

GUDDOONSHAHA

GOLAHA SARE EE KACAANKA

ASAGOO ARKAY Xaashidii 1aad iyo tii 2aad ee Kacaanka 21kii Oktoobar 1969;

ASAGOO ARKAY Qodobka 5naad (lambarka 4aad ee sharciga ku saabsan dhismaha Ciidanka Boliiska lana soo saaray 23kii dicembar 1972, kuna lambarsan 2;

ASAGOO TIXGELIYEY Shaqadiisa wanaagsan iyo muteysi awgeed (merito eccezionale) iyo u bislaasho;

ASAGOO ARKAY Warqaddii lambarkeedu ahayd XGM/GSK-13-199 taariikhdeeduna ahayd 24.2.1975 ee Madaxtooyada GSK kuna saabsaneyd in la dallacsiiyo Gaashaanle Sare Cabdullaahi Maxamuud Xasan;

ASAGOO DHEGEEYSTAY Taladii Xoghayaha Dawladda ee Arrimaha Gudaha uu soo jeediyey.

WUXUU XEERAY

Qodobka 1aad

In Gaashaanle Sare Cabdullaahi Maxamuud Xasan ee ka tirsan Ciidanka Boliiska isla markaasna ah Taliyaha Ciidanka la dallacsiiyey lana gaarsiiyey darajada ah Sarreeye Guuto, marka laga billaabo 20.12.1974, kuna hirgeleysa xagga sharciga iyo dhaqaalahaba.

Qodobka 2aad

Xeerkani degdeg buu u dhaqan gelaya, waxaana lagu dhigi doonaa Faafinta Rasmiga ah ee Dawladda.

Muqdisho, 24 Febberayo 1975.

Xoghayaha Arrimaha Gudaha

*(S. G. Jaamac Maxamed Qaalib)*

*(Jaalle S. G. Maxamed Siyaad Barre)*

GUDDOONSHAHA
GOLAHA SARE EE KACAANKA

XEER WASAARADDA ARRIMAHA GUDAHA
Tr. 13 Febberayo 1975 L. 43.

XOGHAYAHA WASAARADDA ARRIMAHA GUDAHA

ISAGOO ARKAY Xaashida 1aad iyo tan 2aad ee Kacaanka 21ka Oktoobar 1969kii;

ISAGOO ARKAY Sharciga lambarkiisu yahay 52 ee 8 Juun 1972, lagu naadiyey Faafinta Rasmiga ah ee 21.9.1972, kuna saabsan maamulka Dowladda Hoose;

ISAGOO ARKAY Xeerka Wasaaraddan oo lambarkiisu yahay 12122, taariikh 13.12.1972 ee hore loogu magacaabay qaybaha Wakiillada Beesha ee Guddiga Kacaanka Degmooyinka Belet-weyne iyo Buulo-Burti;

ISAGOO ARKAY Xeerka Wasaaraddan ee lambarkiisu yahay ADM/6/5-767, taariikh 1.1.1974 ee hore loogu magacaabay qaybta Wakiillada Beesha ee Guddiga Kacaanka Degmada Jalalaqsi;

ISAGOO OGAADAY Inay lagama maarmaan ahay in la magacaabo Wakiillada Beesha ee Guddiyada Kacaanka Degmooyinka Belet-weyne, Bulo-Burti iyo Jalalaqsi kana tirsan Gobolka Hiiraan, iyadoo la waafajinayo Qodobka 10aad lambarkiisa 3aad, xarafka (c) ee sharciga kor ku tilmaamaan;

ISAGOO TIXGELINAYA Taladii uu soo jeediyey Guddiga Kacaanka Gobolka Hiiraan;

WUXUU XEERAY

Qodobka 1aad

Magacaabidda Guddiga Kacaanka Degmooyinka Belet-weyne, Bulo-Burti iyo Jalalaqsi, qaybahooda Wakiillada Beesha.

Dadka magacyadoodu halkan hoose ku taxan yahiin waxaa loo magacaabay inay noqdaan xubno Guddiyada Kacaanka Degmooyinka ay ku hoos qoran yahiin:

**DEGMADA BELET-WEYNE**

1. Jaalle Faaduma Uurey Diirshe;
2. » Cilmi Xiirey Afrax
3. » Kaaha Shiikh Xasan Muxumad;
4. » Salaado Soofe Liibaan;
5. » Cabdi Kaahin Xasan;
6. » Cabdi Daahir Cumar;
7. » Yuusuf Nuur Siyaad;
8. » Shiikh Maxamed Salaad;
9. » Cali Nuur Axmed;

10. » Cali Colow Kuddoon;
11. » Macallim Maxamed Maxamuud;
12. » Khaliif Cabdikariim Idiris;
13. » Cabdi Askar Maxamed;
14. » Dhoodi Shiiraar Cawaale;
15. » Xaaji Maxamed Cabdalla Labani;
16. » Shiikh Xasan Cumar;
17. » Maxamed Xaaji Xabiibulaah.

**DEGMADA BUULO-BURTI**

1. Jaalle Xasan Ibraahim Faarax;
2. » Xaaji Aamin Xaaji Maxamed Cabdi;
3. » Cabdulle Jumcaale Maxamed;
4. » Daahir Xasan Cabdi;
5. » Taabud Axmed Saalax;
6. » Shiikh Ciise Aadan;
7. » Siraad Maxamed Xaabad;
8. » Booto Xuseen Axmed;
9. » Ganey Xiirey Shiilow;
10. » Maxamed Cismaan Cabdi;
11. » Xaaji Xasan Cali Cabdi;
12. » Cali Maxamuud Xasan;
13. » Xuuriye Cali Siyaad;

**DEGMADA JALALAQSI**

1. Jaalle Cabdi Nuur Cifaf;
2. » Sheekh Rashiid Xaaji Axmed;
3. » Muumin Kuusoow Cismaan;
4. » Shiikh Cabdi Cumar Faarax;
5. » Maxamed Axmed Cabdiraxmaa;
6. » Cabdiraxmaan Xasan Cabdi;
7. » Hareey Waasuge Faarax;
8. » Maxamuud Afrax Guure;
9. » Cimli Cali Nuur.

Qodobka 2aad

*Dhaqan qal*

Xeerkani wuxuu dhaqan gelayaa ka bilaabanta 20.10.1974. waana in lagu qoro Faafinta Rasmiga ah ee Qaranka.

Muqdisho, 13 Feb. 1975.

*S. G. Jaamac Maxamed Gaalib*
Xoghayaha Arrimaha Gudaha

# BOGGA SADDEXAAD

## TALOOYIN ISGARSIIN IYO WIXII LA MID AH

### GUDDOOMIYAHA DEGMADA BELET WEYNE

*N A A D O   D H U L*

Waxaa dhamaan la ogeysiinayaa dadweynaha degan degmada Belet-Weyne in Jaalle Cabduraxmaan Xaaji Xasan Cusmaan uu keenay Xafiiskaan arji taariikhdu markay ahayd 14.9.74 uu ku doonayo in ruqsad Wilki ah loogu ogolaado cad dhul ah oo ku yaal degmadatan Belet-Weyne Xaafadda Xaawa Taako — laanta Onkod — waddada ka soo baxda Buunto Weyn dhinaceeda Koofureed.

Sidaas awaadeed Ruux kasta oo dhulkaas daneynaaya waa inuu keenaa xafiiskaan dacwad ka horjeeda ogeysiiskaan inta aysan dhamaan 30 (soddonka) maalmood oo sharci ahaanta looga dacwoon karo dhulkaas sida uu dhigayo xeerka dhulka oo ka bilaabata 30.9.74 ilaa 29.10.74 mudadaas oo uu ku dheganaan doono looxa ogeysiisyada ee degmadatan.

B. Weyn 29.9.74.

Guddoomiyaha Degmada
(27) *w. s. Xasan Gurxan Ibraahim*

---

### GUDDOOMIYAHA DEGMADA BELET WEYNE

*N A A D A   D H U L*

Waxaa dhamaan la ogeysiinayaa dadweynaha degan degmadatan Belet-Weyne in Jaalle Cabduraxmaan Xaaji Xasan Cusmaan uu keenay xafiiskaan taariikhdu markay ahayd 14.9.74 arji uu ku doonayo in ruqsad Milki ah loogu ogolaado cad dhul ah oo ku yaal degmadatan Belet-Weyne Xaafadda Xaawa Taako laanta Onkod waddada ka soo baxda Buunto1Weyn dhiceceeda Koofureed.

Sidaas aawadeed ruux kasta oo dhulkaas daneynaaya waa inuu keenaa Xafiiskaan dacwad ka horjeeda ogeysiiskaan inta aysan dhamaan 30 (soddonka) maalmood oo sharci ahaanta looga doodi karo dhulkaas, sida uu caddeynaayo xeerka u degsan dhul bixinta, muddadaas oo uu ku dheganaan doono looxa ogeysiisyada ee degmadatan laga bilaabo 30.9.74 ilaa 29.10.74.

B. Weyn 29.9.74.

Guddoomiyaha Degmada
(28) *w. s. Xasan Gurxan Ibraahim*

## GUDDOOMIYAHA DEGMADA BELET WEYNE

### *N A A D A  D H U L*

Waxaa dhamaan la ogeysiinayaa dadweynaha degan degmada Belet-Weyne in Jaalle Cabduraxmaan Xaaji Xasan Cusmaan uu keenay xafiiskaan taariikhdu markay ahayd 14.9.74 arji uu ku doonayo in ruqsad Milki ah loogu ogolaado cad dhul ah oo ku yaal degmadatan Belet-Weyne Xaafadda Xaawa Taako — laanta Onkod — waddada ka soo baxda Buunto-Weyn dhineceeda koofureed.

Sidaas aawadeed ruux kasta oo dhulkaas daneynaaya waa inuu keenaa xafiiskaan dacwad ka horjeeda ogeysiiskaan inta aysan dhamaan 30 (Soddonka) maalmood oo sharci ahaanta looga doodi karo dhulkaas, sida uu dhigayo xeerka u degsan dhiibida dhulka; muddadaas oo uu ku dhegsan yahay looxa ogeysiisyada ee degmadatan laga bilaabo 30.9.74 ilaa 29.10.74.

Belet-Weyne, 29.9.74.

Guddoomiyaha Degmada
*w. s. Xasan Gurxan Ibraahim*

*(29)*

---

## GUDDOOMIYAHA DEGMADA BELET WEYNE

### *N A A D A  D H U L*

Waxaa dhamaan la ogeysiinayaa dadweynaha degan degmadatan Belet-Weyne in Jaalle Cabduraxmaan Xaaji Xasan Cusmaan uu keenay xafiiskaan taariikhdu markay ahayd 14.9.74 arji uu ku doonaayo in ruqsad Milki ah loogu ogolaado cad dhul ah oo ku yaal degmadatan Belet-Weyne xaafadda Xaawa Taako laanta Hilaac waddada lugta ah oo ka soo leexata Daraawiishta dhinaceeda Bari.

Sidaas aawadeed ruux kasta oo dhulkaas daneynaaya waa inuu keenaa Xafiiskaan dacwad ka horjeeda ogeysiiskaan inta aysan dhamaan 30 (soddonka) maalmood oo sharci ahaanta looga doodi karo dhulkaas sida uu caddeynaayo xeerka u degsan dhul bixinta, muddadaas oo uu ku dheganaan doono looxa ogeysiisyada ee degmadatan laga bilaabo 30.9.74 ilaa 29.10.74.

B. Weyne, lì 29-9-74.

Guddoomiyaha Degmada
*w. s. Xasan Gurxan Ibraahim*

*(30)*

## WASAARADDA HAWLAHA GUUD

### *N A A D A  D H U L*

Waxaa la caddeynayaa in Jaalle Maxamed Cabaas Suufi, u soo qortay arji qaybta Dhismaha iyo Dhulka maalintii 2.2.75, uu ku weydiisanayey dhul dhismo dowladeed kuna yaal Muqdisho xafadda Yaaq-Shiid, oo leh qiyaas seddax gees ah 17x16; 22 kuna fadhiya 136 mdh.
Soohdin:

Waqooyi waxaa ka xgia: jid.
Koofur waxaa ka xiga: jid.

Galbeed waxaa ka xiga: Maxamed Cabaas dhulka horay loo siiyay.
Bari waxaa ka xiga: jid.

Qofkii dannaynayaa wuxuu si fiican uga arki karaa naqashadda dhulka oo taal Qaybta Dhismaha iyo Dhulka ee Wasaaradda Hawlaha Guud, dhulkaa waxaa laga doodi karaa muddo ku siman 30 (soddon) maalmood, ee laga bilaabo maantii lugu naadshey buuga xeerka dawladda.

Muqdisho, 1 Marso 1975.

Maamulaha Qaybta Dhismaha iyo Dhulka
(31) *Maxamed Cabdi Saciid*

---

## WASAARADDA HAWLAHA GUUD

### *N A A D A  D H U L*

Waxaa la caddeynayaa in Jaalle Maxamed Xaaji Cabdullaahi «Burcad», uu soo qortay arji qaybta Dhismaha iyo Dhulka maalintii 14.12. 1974kii, uu ku weydiisanayey dhul dhismo dowladeed kuna yaal Muqdisho xafadda Hodan, oo leh qiyaas rektangolar ah 30x27 kuna fadhiya 810 mdh.
Soohdin:
Waqooyi waxaa ka xiga: jid.
Koofur waxaa ka xiga: jid.
Galbeed waxaa ka xiga: jid.
Bari: waxaa ka xiga: jid.

Qofkii dannaynayaa wuxuu si fiican uga arki karaa naqashadda dhulka oo taal Qaybta Dhismaha iyo Dhulka ee Wasaaradda Hawlaha Guud, dhulkaa waxaa laga doodi karaa muddo ku siman 30 (soddon) maalmood, ee laga bilaabo maantii lugu naadshey buuga xeerka dawladda.

Muqdisho, 1 Marso 1975.

Maamulaha Qaybta Dhismaha iyo Dhulka
(32) *Maxamed Cabdi Saciid*

## WASAARADDA HAWLAHA GUUD

### *N A A D A   D H U L*

Waxaa la caddeynayaa in Jaalle Xaaji Ibraahim Nuur, u usoo qortay arji qaybta Dhismaha iyo Dhulka maalintii 4.1.75, uu ku weydiisanayey dhul dhismo dowladeed kuna yaal Muqdisho xafadda Hodan, oo leh qiyaas afar gees ah 30x30, kuna fadhiya 900 mdh.

Soohdin:
Waqooyi waxa ka xiga: Maxamed Cali Dacar.
Koofur waxaa ka xiga: jid.
Galbeed waxaa ka xiga: jid.
Bari waxa ka xiga: Ahmed Xaaji Afrax.
Qofkii dannaynayaa wuxuu si fiican uga arki karaa naqashadda dhulka oo taal Qaybta Dhismaha iyo Dhulka ee Wasaaradda Hawlaha Guud dhulkaa waxaa laga doodi karaa muddo ku siman 30 (soddon) maalmood, ee laga bilaabo maantii lugu naadshey buuga xeerka dawladda.

Muqdisho, 1 Marso 1975.

Maamulaha Qaybta Dhismaha iyo Dhulka
(33) *Maxamed Cabdi Saciid*

## WASAARADDA HAWLAHA GUUD

### *N A A D A   D H U L*

Waxaa la caddeynayaa in Jaalle Axmed Yuusuf Maxamed, u usoo qortay arji qaybta Dhismaha iyo Dhulka maalintii 25.8.74, uu ku weydiisanayey dhul dhismo dowladeed kuna yaal Muqdisho xafadda Hodan, oo leh qiyaas rektangolar 20x30, kuna fadhiya 600 mdh.

Soohdin:
Waqooyi waxaa ka xiga: Dhul lamb. 15.
Koofur waxaa ka xiga: jid.
Galbeed waxaa ka xiga: Dhul lamb. 20.
Bari waxaa ka xiga: Dhul lamb. 21.

Qofkii dannaynayaa wuxuu si fiican uga arki karaa naqashadda dhulka oo taal Qaybta Dhismaha iyo Dhulka ee Wasaaradda Hawlaha Guud, dhulkaa waxaa laga doodi karaa muddo ku siman 30 (soddon) maalmood, ee laga bilaabo maantii lugu naadshey buuga xeerka dawladda.

Muqdisho, 1 Marso 1975.

Maamulaha Qaybta Dhismaha iyo Dhulka
(34) *Maxamed Cabdi Saciid*

## WASAARADDA HAWLAHA GUUD

### *BEDDELAAD NAADO DHUL*

Waxaa la caddeynayaa in dhulkii uu soo weydiistay Jaalle Cusmaan Axmed Doore, maalintii 20.6.60 loona ogolaaday oo ku yiil Muqdisho degmada Wadajir, jidka Yalane uu iska beddelay cabbirkii hore oo qaabkiisu ahaa afar gees addimihiisuna ahaayeen 50x50, kuna fadhiye 2500 mdh, sababtoo ah in uu isbeddelay.

Sidaas aawadeed naadadii hore oo lagu soo diray warqadda lambarkeedu ahaa BF-546-1024-67 ee 13.6.67 kana baxday xafiiskaan, waxay isu beddeshay sida hoos ku tilmaaman:

Rasmi ahaan dhulka haatan la siin-karo jaallahaas qaabkiisu waa rektangolaar addimihiisu yihiin 50x47, kuna fadhiya 2350, soohdimihiisuna yihiin sida soo socota:

Waqooyi waxaa ka xiga: Dhul dad leeyahay.
Koofur waxaa ka xiga: jid.
Galbeed waxaa ka xiga: Dhul dad leeyahay.
Bari waxaa ka xiga: Jid yar oo 3 meytar ah.

Muqdisho, 1 Marso 1975 .

Agaasimaha Waaxda Dhismaha iyo Dhulka
*(35)* *Maxamed Cabdi Saciid*

## MAXKAMADDA GOBOLKA BANAADIR

Markuu arkay Dacwada horay ku qoran; markuu tixgeliyay waxa ay ku saabsan tahay iyo ogeysiiskii Bangiga Keydka iyo amaahda waxaan ogaaday in ay tahay Shaqadeyda.

Markuu arkay Qodobka 69, D.L. 9/9/65, L. 2; waxaan caddeynayaa dhumiddii Buugga Lacagta (Ammortamento Libretto) N. D. R. 10380, Shilin So. 500.

Waxaan amrayaa in loo sameeyo Buug Lacag oo Cusub ninka la yiraahdo Axmed Saleemaan Bidde, 30 Beri kaddib markii lagu shaaciyo Faafinta Rasmiga ah ee Dawladda Amarkan, haddii cidna ayan wax ku shegan waxaa la codsanayaa in Buugga Cusub Gacanta laga saaro ninka Magaciisa kor ku xusan yahay ama qof ka wakiil ah iyadoo la sugayo 30ka beri ee aan soo sheegnay.

Muqdisho, 26.1.75.

*(36)* *Yassin Shire Faarax*
Guddoomiyaha Maxkamadda

## MAXKAMADDA DEGMADA QARDHO

Hadaan arkay warqadii dacwadda ee uu soo qortay Jaallaha magaciisu yahay Cumar Ismaciil Xaaji Samantar.

Maxkamaddu markey aragtay dacalkii aseeyada lamb. 005582 ee taariikhdiisu ahayd 23.12.74, ee ay aseeyada ku qornayd lacag ah Sh. So. 1.300; kuna dhunta degmada Qardho iyo Xamar dhexdooda.

Maxkamaddu markey aragtay qodobka 69 Dekeretto Lejislatibo ee 9.9.65 Lamb. 2; wexeey amreysaa inaan la qaadan karin aseeyada lambarkeedu kor ku qoranyahay lana aqoonsan karin aseeyada lambar 005582 Shs. 1.300; ay ku qorantahay kuna dhigan magaca Jaalle Cumar Ismaciil Xaaji Samantar.

Maxkamaddu wexey ogolatay in loo celiyo lacagtaas Jaalle Cumar Ismaciil Xaaji Samantar, markey dhamaato 30 beri laga soo bilaabo maalinta lagu qoro degretadaan Faafinta Sharciga. Isla markaas waxaa la amrayaa Jaalle Cumar Ismaciil Xaaji Samantar in uu geliyo Faafinta Sharciga bixiyana Kharajka Faafinta.

Waxaan amreynaa Baanka Ganacsiga Soomaaliyeed ineey ku dhejaan degretadaan derbiyada Xafiisyada mudo ah 30 (Sodon) beri.

Qardho, 29.1.1975.

Guddoomiyaha Maxkamadda

(37) *Dr. Cali Maxamed Gure*

## MAXKAMADDA GOBOLKA BANAADIR

Waxaan arkay dacwadac; markaan arkay waxay ku saabsantahay iyo ogeysiiskii Bankiga Ganacsiga Ummadda, waxaan ogaaday iney tahay shaqadeyda.

Arkay qodobka 69 D.L. 9.9.65 N. 2; waxaan cadeynayaa dhumidii buugga lacagta (ammortamento libretto) n. D.R. 741, Sh. So. 1.100; (kuniyoboqol).

Waxaan amrayaa in loo sameeyo buugga Jaallaha la yiraahdo Axmed Nuur Maxamed 30 beri ah ka bilaabato maalinta lagu shaaciyo Faafinta Rasmiga, haddaan qof kale ku sheeganaya usan jirin.

Waxaa kale codsanayaa in Buugga gacanta laga saaro Axmed Nuur Maxamed ama qof kale sita wakaalad sharci ah.

Muqdisho, 4.3.1975.

Guddoomiyaha Maxkamadda

(38) *Dr. Yasiin Shire Faarax*

## MAXKAMADDA GOBOLKA BANAADIR

Waxaan arkay dacwadan; markaan arkay waxay ku saabsantahay iyo ogeysiiskii Bankiga Ganacsiga Soomaliya—Taliska Guud, waxaan ogaaday iney tahay shaqadeyda.

Arkay qodobka 69 D.L. 9.9.65 n. 2; waxaan cadeynayaa dhumidii buugga lacagta (ammortamento libretto) n. D.R. 6844, Sh. So. 3000 Sh. So. 26 oo korsaar ah.

Waxaan amrayaa in loo sameeyo buugga Jaal. la yiraahdo Ambiya Nuur Afrax, muddo 30 beri ah, oo ay ka bilaabato maalinta lagu shaaciyo Faafinta Rasmiga haddaan qof kale ku sheeganayaa usan jirin.

Waxaan kale codsanayaa in Buugga gacanta laga saaro Jaalle Ambiya, ama qof kale oo ka sita wakaale sharci ah.

Muqdisho, 3.3.75.

Guddoomiyaha Maxkamadda
*(39)* *Dr. Yasiin Shire Faarax*

## MAXKAMADDA GOBOLKA SH. HOOSE

Hadduu arkay arjiga Jaalle Xuseen Axmed Cabdurab deggan Janaale taar. 5.3.75 iyo xaashida Bankiga Ganacsiga Ummadda — Laanta Marka — taar. 5.3.75;

Hadduu arkay Qod. 69 L. 9.9.65 N. 2:

WAXAA CADDATAY in buugga lambarkiisu yahay 1329 taar. 29.12.74 (libretto di Risparmio) uu dhumay, buuggas oo ay ku qoran tahay lacag dhan Sh. So. 5005 (Shankun iyo shan) shilin ee Bankiga Ganacsiga Ummadda — Laanta Marka.

WAXAAN AMRAYAA in loo cusbooneysiiyo mar kale buugga kor ku xusan muddo 30 (soddon) casho ah ka dib ka bilaabato markii lagu dhigo Faafinta Rasmiga ah (Bollettino Ufficiale) haddaan la helin qof sheegta waa in gacanta laga saaro ninka magaciisu ku qoran yahay ama qof ka wata wakaala Sharci ah 30 soddonkaas barina waa in la sugo.

Marka, 6.3.1975.

Guddoomiyaha Maxkamadda
*(40)* *Sh. Cabdiraxmaan Diiriye*

MAXKAMADDA GOBOLKA BANAADIR

---

Markaan arkay weydiintii Wasaaradda Gaashaandhigga Agaasimaha Guud ee Xaqa iyo Gunnada Ciidamada Qalabka Sida.

Markaan arkay Qod. 69 D.L. 1969 N. 2; waxaa cad dhumista Jeegga Wareega L. 006620, kuba qorneyd Sh. So. 550,00 (Shanboqoliyoqonton) shilin ee Bankiga Dhexe ee Soomaaliyeed, waxaan idiinku amreynaa in loo cusbooneysiiyo mar labaad Jeegga aan kor ku soo sheegay muddo 15 beri oo ka bilaabato markii lagu dhigo Faafinta Rasmiga (B.U.) haddaan la helin cid sheegata waana in gacanta laga saaro Agaasinka Guud ee Xaqa iyo Gunnada Ciidamada Qalabka sida ama qof sita Wakaalad sharci ah.

Muqdisho, 25.2.1975.

Guddoomiyaha Maxkamadda

*(41)* *Dr. Yasiin Shire Faarax*

---

MAXKAMADDA GOBOLKA J. HOOSE

---

Markuu akhriyey dacwaddan. Markuu arkay waxay ku saabsan tahay ogeysiiskii Bankiga Ganacsiga Soomaalidda Laanta Kismayo aan ogaaday inay tahay shaqa xafiiskan.

Markan arkay Qodobka 69 D.L. 9.9.1965 N. 2; waxaan caddeynayaa dhumida buugga Kaydka L. 1529, ku qoran lacag dhan 3.510; (sadeexkunshanboqooliyotobaan); waxaan amrayaa in loo cusbooneeysiyo Cabdullahi Cali Salaad muddo 15 (Shaniyotobaan) beri gudaheeda laga bilaabo markii lagu dhigo Faafinta Rasmiga ah haddan la helin qof kale oo buugga sheegta. Waxaa kaloo la caddeynayaa in buugga gacanta laga saaro ninka kor ku qoran ama qof kale oo ka sitaa wakaalad aan shaki ku jirin.

Kismayo, 20 Febberayo 1975.

Guddoomiyaha Maxkamadda

*(42)* *Dr. Xuseen Faarax Hilowle*

MAXKAMADDA GOBOLKA BANAADIR

Markaan arkay weydiintii Saciid Maxamed Madar.

Markaan arkay Qod. 69 D.L. 1969 N. 2; waxaa cad dhumista Jeegga wareega L. 12106, kuna qorantahay Sh. So. 8.600 (sideedkunlixboqol) shilin ee Bankiga Ganacsiga Ummadda — Burco, waxaan idiinka amreynaa in loo cusbooneysiiyo mar labaad Jeegga aan kor ku soo sheegay muddo 15 beri oo ka bilaabata markii lagu dhigo Faafinta Rasmiga, haddaan la helin cid sheegata, waana in gacanta laga saaro Jaallaha magaciisa kor ku qoran yahay, ama qof sita Wakaalad Sharci ah ayadoo la sugayo 15 beri.

Muqdisho, 19.3.1975.

Guddoomiyaha Maxkamadda

*(43)* *Dr. Yasiin Shire Faarax*